## SUURAT AL-FIIL:

***Magaca Eebe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.***

***1. Ma Ogtahay sida Eeba ku falay asaxaabtii Maroodiga "Colkii".***

***2. Miyaan Eebe ka yeelin dhagartoodii wax dhumay.***

***3. Oosan ku dirin korkooda Shimbiro kooxa ah.***

***4. Kuna tuuraysa Dhagaxyo la kululeeyay.***

***5. Markaas Eebe ka yeelay Bal la daaqay sidiis.***

Qur'an 105: 1-5

***Sharaxda Suurrada***
Suuraddaani waxay ka warrami arrin dhacday, Nabiga " Nabadgalyo iyo Naxariis Korkiisa Eebe ha yeelee" dhalashadiisii wax yar ka hor, oo ah in gaal xabashi ah Yaman ka soo duulay si uu u soo dumiyo Kacbada Sharafta leh, markuu Maka ku soo dhawyahayna Eebe ku sii daayay shimbiro dhagaxyo ku tuuri colkiina saa ku jabay, Kacbadiina nabadgashay. Arrintaasu la yaab ma leh, maxaa yeelay Eebe isagaa awood leh, immisayse dhacday wax shimbiro ka yar intay wax halaageen.